Hudson Hospital & Clinic
HealthPartners®

# XEERKA BIIL DIRISTA IYO URUURINTA -#835

Ujeedada Xeerkaan Biilashada iyo Uruurinta waa qeexida qaabka Isbitaalka Hudson ee helidda lacagta laga qaado adeegga daryeelka ee la siiyay bukaanada. Haddii uu kiisku la xiriiro mid aan lacag la bixineynin, Isbitaalka waxaa ka go'an in uu sameeyo dadaal macquul ah oo lagu go'aansanayo haddii bukaanka xaq u leeyahay caawinta dhaqaalaha ka hor inta aan la guda gelin tallaabooyinka la xiriira uruurinta. Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka Isbitaalku waxay awood u leedahay isla mar ahaantaana uu xil ka saaran yahay inay go'aan ka qaadato bal haddii Isbitaalka uu sameeyay dadaal macquul ah oo lagu go'aansanayo haddii shaqsi u xaq leeyahay caawinta dhaqaalaha iyo haddii Isbitaalka u ogolaaday in uu ka hawlgalo tallaabooyin gaar ah oo la xiriira uruurinta kuwaasoo lagu qeexay Xeerkaan Biilka iyo Uruurinta.

**TALLAABOOYINKA LAGA YAABO IN ISBITAALKA UU QAADO SI UU U HELO LACAGTA KHARASHKA**

Isbitaalka Hudson waxaa laga yaabaa in uu ku lug-yeesho hawlaha uruurinta kuwaasoo ujeedada laga leeyahay ay tahay sidii lagu heli lahaa lacagaha kharashka ee ku baxay adeegyada la bixiyey. Qaar ka mid ah hawlaha uruurintu waa kuwo ka muhiimsan hawlaha kale isla mar ahaantaana waxay u baahan yihiin in la helo qoraal ogeysiin ah oo loogu talogaley bukaanada, sida lagu qeexay Xeerkaan. Si kastaba ha ahaatee, Isbitaalka lagama rabo in uu bixiyo ogeysiis qoraal ah oo loogu talogaley bukaanada marka la qabanayo hawlaha la xiriira uruurinta kharashka aan muhiimka ahayn.

Isbitaalka Hudson **uma** baahna in uu siiyo ogeysiin bukaanada ka hor inta uuna guda gelin shaqooyinka hoose ee la xiriira uruurinta:

- U dirista bukaanka qoraalada biilka ee ay ku jiraan lacagta lagu leeyahay iyo haraaga bixinteeda la soo dhaafay
- Isku day la xiriira wada-hadal lagu xalinayo bixinta lacagta lagu leeyahay qofka
- U gudbinta akoontiga bukaanka ee loogu talogaley waax sadexaad oo qaabbilsan uruurinta deynta ama hay'ada qaabbilsan arrimaha sharciga
- Dirista waraaqaha ama wicitaanada taleefonka, taasoo laga dirayo Isbitaalka, hay'ada qaabbilsan uruurinta ee wakiilka ka ah Isbitaalka, ama hay'ad kale oo mataleysa isbitaalka

Isbitaalka Hudson **waxaa** looga baahan yahay inuu bukaanada siiyo ogeysiis ka hor inta aan la guda gelin hawlaha uruurinta (sida loo yaqaan"Tallaabooyinka Uruurinta aan Caadiga aheyn" ama "ECAs"):

- Bilaabida dacwadaha sharciga, ee Isbitaalka ama wakiilka isbitaalka, ee laga yaabo in ay ku jirto
  - Cabasho yar/maxkamada heshiisiinta
  - Abaalgudka mushaarka
- Diidmada, difaacida, ama dalbashada lacag bixinta ka hor inta aan la siinin daryeelka mustaqbalka.
  - Isbitaalka Hudson <u>marna</u> ma diidayo daryeelka degdeg ah sabab la xiriirto lacag bixin la'aanta daryeel la qaatay waqti hore isla mar ahaantaana wuxuu isbitaalku u hoggaansami doonaa dhammaan shuruudaha Daaweynta Caafimaadka Degdeg ah & Xeerka Shaqada (EMTALA).

**<u>DADAALADA LAGU GO'AANSANAYO XAQ U LAHAANSHAHA CAAWINTA DHAQAALAHA</u>**

**<u>Codsiyada iyo Ogeysiinada</u>**:

Isbitaalka wuxuu oggolaanayaa kadibna meel marinayaa codsiyada la xiriira caawinta dhaqaalaha taasoo ka billaabaneysa taariikhda bukaanka la siiyey daryeelka isla mar ahaantaana ku dhamaaneysa **muddo 240 maalmood ah** ka dib marka uu qofku helo qoraalka biilka ka saarida ugu horeysay. Isbitaalka Hudson wuxuu qaadayaa tallaabooyin bukaanada lagu ogeysiinayo macluumaad ku saabsan Xeerka Caawinta Dhaqaalaha Isbitaalka iyo waqtiyada aan loo baahneyn in la guda galo Tallaabooyinka Uruurinta Aan caadiga aheyn ee kor lagu sheegay ugu yaraan **muddo 120 maalmood ah** oo ka billaabaneysa taariikhda uu bukaanku helay qoraalka biilka ka saarida lasoo dhaafay ee hore. Haddii xaaladda bukaanka ay la xiriirto qaybo badan oo daryeel ah, Isbitaalka ma gudo geli doono Tallaabooyinka Uruurinta Aan caadiga ahayn ugu yaraan **120 maalmood ah** oo ka billaabaneysa marka uu bukaanku helo qoraalka biilka ka saarida la soo dhaafay ee ugu horreeyey.

Ugu yaraan **30 maalmood** ka hor inta uuna Isbitaalku guda gelin Tallaabooyinka Uruurinta Aan caadiga ahayn ee aan lacag bixin ahayn, Isbitaalka Hudson wuxuu ku tallaabsaanayaa arrimaha soo socda :

- Bixinta qoraal ogeysiin ah (inta badan waa warqad lagu hagaajinayo ciwaankii boostada ugu danbeeyey ee bukaanka) kaasoo bukaanka lagu ogeysiinayo in:
    - Caawinta dhaqaalaha loo heli karo shaqsiyaadka xaqa u leh
    - Waxaa dhici karta inuu Isbitaalku qaato Tallaabooyinka Uruurinta aan Caadiga ahayn si loo helo lacagta kharashka
    - Waxaa laga yaabaa in muddo 30 casho kadib marka bukaanku helo warqadda ogeysiinta kadib uu Isbitaalku guda galo hawlaha la xiriira Uruurinta aan Caadioga ahayn
- Warqadda ogeysiinta kula lifaaq xaashi luuqad bayaan oo ay ku qoran tahay guudmar ku saabsan Xeerka Caawinta Dhaqaalaha Isbitaalka
- Isku dayga lagula xiriirayo bukaanka taleefon ahaan (ama qof ahaan haddii ay suurtogal tahay) si af ahaan loogu wargeliyo bukaanka macluumaadka ku saabsan Xeerka Caawinta Dhaqaalaha Isbitaalka iyo sida uu bukaanku ku heli karo caawinta la xiriirta habraaca codsiyada

Haddii isbitaalka Hudson go'aansado in uu dib u dhigo ama diido daryeelka aan degdeg ah ahayn sabab la xiriirto lacag bixin la'aanta daryeelka hore, Isbitaalku wuxuu ku tallaabsanaya arrimaha hoos ku qoran:

- In bukaanka la siiyo qoraalka ogeysiinta taasoo ay weheliso:
    - Foomka codsiga Xeerka Caawinta Dhaqaalaha
    - Qiraal caddeyn ah oo ku saabsan in la heli karo caawinta dhaqaalaha ee loogu talogaley shaqsiyaadka u qalma iyo waqtiga kama-danbeysta ee Isbitaalku qabanayo codsiyada caawinta dhaqaalaha ee loogu talogaley daryeelka hore ee bukaanka
- Habraac, ku saleysan qaab degdeg ah, wax alla wixii codsi ah ee la xiriira caawinta dhaqaalaha ee ay helaan bukaanadu kahor inta aan la gaarin waqtiga kama-danbeysta ah

**<u>Codsiyada aan Dhameystirneyn</u>**:

Haddii Isbitaalka Hudson helo codsiga caawinta dhaqaalaha oo aan dhameystirneyn ama mid ay tayadiisu xun tahay, Isbitaalka wuxuu ku tallaabsanayaa arrimaha hoos ku qoran:

- Joojinta wixii Tallaabooyin Uruurin Aan caadi ahayn

- In bukaanka la siiyo warqadda ogeysiinta taasoo ay ku qeexan tahay xog dheeraad ah ama dukumintiyo loo baahan yahay in lasoo gudbiyo kahor inta aan codsiga la socodsiinin iyo qaabka loola xiriirayo Isbitaalka
- Haddii uu bukaanka buuxiyo codsiga la xiriira caawinta dhaqaalaha taasoo waafaqsan muddada loo baahan yahay in wax lagu codsado, Isbitaalka wuxuu si dhaqso ah u qaadanayaa go'aan sida ku cad qeybta hoose ee Codsiyada Dhameystiran.

**Codsiyada Dhameystiran**:

Haddii uu Isbitaalka uu helo codsi dhameystiran oo la xiriira caawinta dhaqaalaha inta lagu jiro muddada codsiga Isbitaalka, Isbitaalka wuxuu ku tallaabsanayaa arrimaha hoos ku xusan isagoo ilaalinaya waqtiga:

- Joojinta wixii Tallaabooyin Uruurin Aan caadi ahayn
- Sameynta Go'aan ka qaadashada xaq ulahaanshaha caawinta dhaqaalaha iyo aasaaska lagu saleeyey go'aaminta
- Haddii Isbitaalku go'aansado in bukaanka xaq u leeyahay caawinta dhaqaalaha, Isbitaalka wuxuu ku tallaabsanayaa arrimaha hoos ku xusan:
    - Haddii bukaanka uu u qalmo daryeelka dhimista qayb ah (aan ahayn dhimis lacag la'aan ah), Isbitaalku wuxuu bukaanka siinayaa qoraalka biilka kaasoo muujinaya qaabka loo go'aamiyey xaddiga lacagta iyo warbixinta la xiriirta xisaabaha caawinta dhaqaalaha Isbitaalka.
    - Dib u celinta wixii lacag ah ee uu bukaanku ku bixiyey daryeelka taasoo ka badan xaddiga lacagta ee la go'aamiyey inuu shakhsi ahaan bukaanku mas'uul ka yahay
    - Qaadashada dhammaan tallaabooyinka suurtagalka ah ee la heli karo si wax looga beddelo wixii tallaabooyin uruurin ah ee laga yaabo in bukaanka lagula dhaqmay.

**Go'aaminta Xaq ulahaanshaha Loo maleeyay**:

Waxaa dhici karta inuu isbitaalku mala awaalo go'aanka la xiriira xaq ulahaanshaha go'aanada caawinta dhaqaalaha. Tani waxay ka dhigan tahay inay dhici karto inuu isbitaalku go'aansado inuu bukaanku xaq u leeyahay caawinta dhaqaalaha taasoo ku saleysan warbixinta Isbitaalka uu helay ama warbixinta uu isbitaalku hayo iyadoo aan bukaanka si toos ah looga helin wax macluumaad oo dheeraad ah. Haddii

Isbitaalka uu si maleyn ah u go'aansaday in bukaan uu xaq u leeyahay caawinta dhaqaalaha, laakiin la ogaado inuu xaq u leeyahay wax ka yar caawinta ugu badan, Isbitaalka wuxuu ku qaadayaa arrimaha soo socda:

- Ogeysiinta bukaanka ee go'aanka iyo in bukaanka lagu wargeliyo qaabka loo dalban karo caawinta dhaqaalo dheeraad ah
- In bukaanka la siiyo waqti ku filan oo uu ku dalban karo caawinta dheeraadka ah
- Meel marinta codsiga dhameystiran ee caawinta dhaqaalaha sida lagu qeexay Xeerka Biilka iyo Uruurinta